

TAAGEERADA LOOGU TALOGALAY ADEEGYADA TALLAALKA EE ARDAYDA AY HAYSATO XASILLOONI DARRO GURIYEYN

Shuruudaha tallaalka ee Oregon waxay caawiyaan hubinta in ilmo kasta uu haysto fursad uu kula socdo tallaallada loo baahan yahay sannad kasta. Gobol kastaa wuxuu leeyahay sharciyo u baahan tallaalka si loo aado dugsiga. Shaqaalaha dugsiga iyo daryeelka carruurta waxay iska kaashadaan ku ilaalinta carruurta kuwo caafimaad qaba oo badqaba cudurrada laga hortagi karo. Shuruucdan iyo iskaashiyanadi aad bay waxtar uga tareen joojinta ku faafitaanka cudurka ee fasalka iyo bulshada dhexdooda.

WAALIDIINTA IYO MAS'UULIYIINTA

Haddii aad ka hesho warqad ama wicitaan dugsiga ilmahaaga oo kuu sheegaya inay ka dib dhaceen tallaalka ama inay u baahan yihiin diiwaannada tallaallada, waakan waxa aad samayn karto:

1. Kala hadal dugsiga si aad u caddeeyso waxay u baahan yihiin. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu u baahan yahay tallaalka, ama dugsigu wuxuu u baahan karaa koobiga diiwaannada tallaalka.
2. Haddii ilmahaagu u baahan yahay tallaallo oo aad u baahan tahay in lagaa caawiyo heliddooda, la xiriir waaxda caafimaadka deegaanka ama weydii dugsiga haddii ay ku caawin karaan. Ilmahaagu waxa uu heli karaa tallaalo qiimo jaban ama bilaash ah iyada oo loo marayo barnaamijka [Tallaalada Carruurta](#) haddii aysan lahayn caymis, ay leeyihiin Qorshaha Caafimaadka Oregon, ama ay yihiin Ameerikan Indiyani ama Dhaladka Alaska. Waxaad sidoo kale wici kartaa 211 si aad u ogaato meesha aad ka heli karto tallaalo qiimo jaban ama bilaash ah.
3. Haddii aad leedahay dhakhtar, la xidhiidh dhakhtarka si aad ballan u hesho ama nuqul ka mid ah diiwaanada tallaalka ilmahaaga.
4. Haddii aad dooranayso in aadan tallaalin, daawo [muuqaalka ka-dhaafidda aan caafimaadka ahayn oo soo gudbi shahaadada dhammaystirka dugsiga](#). Haddii aad u baahan tahay kombuyuutar ama internet, ka hubi dugsiga ama maktabadda dadweynaha wixii kaalmo ah.
5. Keen dugsiga diiwaannada tallaalka ee la cusboonaysiiyay.



DUGSIYADA

Waxa jira shan shaqo oo waaweyn oo ay tahay in dugsi kasta ama xarun kastaa qabato.

1. Ururinta diiwaannada tallaalka.
2. Dibu-eegidda diiwaanka si aad u aragto in ardayda ay tahay in la tallaalo.
3. Gudbinta warbixinada kooban ee dibu-eegista koowaad sannad walba.
4. Dhaqangelinta Maalinta Ka saaridda.
5. La wadaagista waalidiinta lambarada tallaalka.

Waa maxay farqiga u dhexeeya sharciyada tallaalka ee u dhexeeya ardayda lagu daboolay McKinney-Vento iyo kuwa aan ahayn?

- ✓ Ardayga loo tixgaliyo guri la'aan waa in isla markaaba la diiwaan geliyo, xitaa haddii aysan lahayn diiwaan tallaalka. Marka la barbardhigo, ardayda kale ee cusub ma bilaabi karaan dugsiga ilaa ay keenaan dugsiga waraaqaha tallaalka.
- ✓ Dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay qoysaska ka caawiyaan sidii ay u ururin lahaayeen rikoorka tallaalka ee ardayda McKinney-Vento sida ku cad [OAR 333-050-0250\(6\)](https://www.oregon.gov/OSL/333-050-0250(6).pdf).

Maxay tahay inaad samayso shaqaale dugsi ahaan ama xidhiidhiyaha McKinney-Vento?

Hadafka ugu weyn waa in laga caawiyo dugsiga in uu helo diiwaanka tallaalka ee ardayga. Haddii ardaygaas uu u baahan yahay tallaalka, kala shaqee qoyska inay helaan goob tallaalka ama buuxiyaan ka-dhaafitaanka caafimaad. Bilowga sannad-dugsiyeedka ayaa ka sii wanaagsan. Haddii aysan soo qaadan **Arbacada 4-aad ee bisha Febraayo** (Maalinta Ka Reebista) ardayga waa laga saarayaa dugsiga ilaa ay ka keenayaan waraaqaha la cusboonaysiiyay.

Sideed uga caawinaysaa in la helo diiwaanka tallaalka ee ardayga?

- ✓ Si aad isu diiwaangeliso ALERT IIS booqo [websaytka Akoonada Isticmaalaha Cusub ee Maamulka Caafimaadka Oregon](https://www.oregon.gov/OSL/333-050-0250(6).pdf) iskuna diiwaangeli isticmaali cusub ahaan.
- ✓ Ka codso diiwaanka dugsigii hore
- ✓ Ka caawi qoyska inay la xiriiraan bixiyihii caafimaad ee hore si ay uga helaan nuqulka diiwaanka, ama
- ✓ Ku xidh qoyska adeegyada tallaalka deegaanka si ay u helaan tallaalka loo baahan yahay. Ka wac 211 ama waaxda caafimaadka deegaankaaga wixii macluumaad ah ee ku saabsan rugaha caafimaadka.

Sideed ku ogaan kartaa in ardaygu u baahan yahay tallaalka?

1. Ka hubi ALERT IIS diiwaanka
2. Ka hubi faylka ardayga si aad u hesho diiwaannada warqadda ee tallaalka ama ka-dhaafitaanka caafimaadka
3. Ku dar dhammaan taariikhaha tallaalka iyo ka-dhaafitaanka nidaamka macluumaadka ardayga ee dugsigaaga (tusaale. Synergy, PowerSchool, iwm.)
4. SIS ayaa muujin doonta in ardaygu uu dhammaystiray ama aanu dhammaystirin tallaalka

Yaad kala xidhiidhaysaa su'aalaha:

- ✦ Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan Sharciga McKinney-Vento, kala xiriir Lexi Neemann halkan OR-MV@ode.oregon.gov
- ✦ Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan shuruudaha tallaalka ee dugsiga, kala xidhiidh Kooxda Tallaalka Dugsiga ee Oregon Health Authority halkan Oregon.imm@odhsoha.oregon.gov



Oregon achieves... together!



OREGON
HEALTH
AUTHORITY



McKinney-Vento
Serving Students In Transition